

Minnesota Truth Council

Golaha Guddoomiyaha ee Diiwaangelinta Xaqiiqada
Hawlgalka Metro Surge iyo Hawlgalka PARRIS



The Advocates
FOR HUMAN RIGHTS

Dadka reer Minnesota waxay la kulmeen, sidoo kalena markhaati ka noqdeen, dhibaataada bani'aadannimo ee ka dhalatay kumannaan wakiillo federaal ah oo loo diray bulshooyinkeenna. Sheekooyinkeenna ku saabsan wixii dhacay waa kuwo muhiim ah. Marka sheekooyinkaas la isu geeyo, waxay dhisaan xaqiiqo wadajir ah iyo diiwaan taariikheed oo ka warramaya wixii halkan ka dhacay.

WAXA KU SAABSAN GOLAHA

Hannan Madaxbannaan oo Lagu Diiwaangelinayo Xaqiiqadaha

Golaha Xaqiiqada ee Minnesota waa gole madaxbannaan oo aan dhinacna raacsanayn, kaas oo diyaarin doona diiwaan taariikheed oo ku salaysan waayo-aragnimada badbaadayaasha iyo markhaatiyaasha, isla markaana soo saari doona warbixin ay ku jiraan talooyin ku saabsan dib-u-habayn sharciyeed iyo mid siyaasadeed.

Ururka The Advocates for Human Rights ayaa ah hay'adda fulinaysa hawlaha Golaha Xaqiiqada ee Minnesota.

Madax-bannaan

Bulshada hoggaaminayso

Daahfuran

Aan dhinac Siyaasadeedna raacsanayn

Ku salaysan baahiyaha dhibbanayaasha

WAXAY GOL AH A DIIWAAN GELIN DOONAA

Sheekada oo Dhan—Dhibaatooyinkii Dhacay iyo Adkaysigeenna

Golaha wuxuu diiwaangelin doonaa:

- Xadgudubyadii xuquuqda aadanaha ee ka dhashay hawlgallada la xoojiyay, oo ay ku jiraan dhibaatooyin jireed, nafsiiyeed, qoys, dhaqaale, iyo bulsho iyo
- Sida dadka reer Minnesota ay isu garab istaageen iyagoo muujiyay naxariis, geesinimo, iyo adkaysi.

Kani ma aha maxkamad. Golaha ma laha awood uu ku dacweeyo, ku xukumto dembi, ku soo rogo ciqaab, ama ku bixiyo magdhow.



Ka qaybqaadashada waa ikhtiyaari. Dadka waxay dooran karaan inay sheekooyinkooda la wadaagaan iyaga oo aan magacooda sheegin. Looma baahna inaad hadda ku sugan tahay Minnesota si aad uga qaybqaadato.

SIDA LOOGA QAYBGALO

Saddex Siyaabood oo Aad Qayb Uga Noqon Karto

- 1 La wadaag sheekadaada.** La wadaag waayo-aragnimadaada gaarka ah. Golaha wuxuu u adeegsan doonaa sheekooyinkan inay noqdaan isha ugu muhiimsan ee xogta, wuxuuna falanqayn doonaa si loo ogaado isbeddellada, sababaha, iyo saameynta ay hawlgallada la xoojiyay yeesheen.
- 2 Abaabul goob lagu wadaago sheekooyinka.** Ka caawi dadka kale inay la wadaagaan sheekooyinkooda adigoo dhiirrigelinaya goobaha bulshada ku kulanto si sheekooyinka loogu wadaago
- 3 Ka qaybgal kulan dadweyne.** Golaha oo ka kooban 15 xubnood ayaa qaban doona ugu yaraan afar kulan oo dadweyne, kuwaas oo sidoo kale si toos ah looga baahin doono internetka.
- 4 Read the report.** Read the final report and recommendations.

YAA KA QAYBGALI KARA

Qof kasta oo ay saameeyeen hawlgalooyinka la xoojiyay

Golaha wuxuu jeclaan lahaa inuu helo sheekooyinka qof kasta oo la kulmay dhibaato, markhaati ka ahaa wixii dhacay, ama qayb ka ahaa dadaalladii bulshada ee looga falceliyay dhacdooyinkaas.

Soo-galootiga

Muwaadiniinta Maraykanka

Qaxootiga

Kormeerayaasha sharciga

Xubin kasta oo ka tirsan bulshada

Saxafiyaainta

Macluumaad dheeraad ah, iimayl ugu dir
MNTruthCouncil@advrights.org.